Kanton Graubünden
Chantun Grischun
Cantone dei Grigioni

# WILLKOMMEN
# BAINVEGNI
# BENVENUTI

Macluumaad loogu talagalay soogalootiga cusub



# MACLUUMAAD LOOGU TALAGALAY SOOGALOOTIGA CUSUB

**Waaxda Isdhexgalka Graubünden**
www.integration.gr.ch
www.hallo.gr.ch

# TUSMO


**1 Allegra, Grüezi, Buongiorno** 9

**2 Macluumaad ku saabsan Swiiserland** 10
Taariikh kooban iyo cilmiga bulshada

**3 Macluumaad ku saaban gobolka Graubünden** 12
Xaqiiqada iyo tirooyinka

**4 Kala duwanaanshiyaha Luqadaha ka jira gobolka Graubünden** 14

**5 Isdhexgalka** 17
Xarunta warkala qaadashada isdhexgalka dadyowga Graubünden
Macluumaad ku saabsan luqadaha badan www.hallo.gr.ch

**6 Xidhiidhka** 19
Luqada, furaha guusha isdhexgalka
Adeegga Tarjumaha

**7 Shaqo** 20
Isdhexgalka xirfadaha
Mushaharka iyo Deeqsiga Bulshada
Shaqo raadsi
Shaqo la'aan – maxaa jira hadda?
Shaqo aan sharci ahayn
Tababar Asaasigaa oo dheeraada
Aqoonsiga shahaadooyinka ajnabiga

**8 Rusqad Degnaanshaha iyo rusqad degnaanshaha lamaanaha iyo carruurta** 24

9 **Guurka iyo qoyska** 25
Guur
Lamaanaha labo jinsi-qaran kala haystaan iyo qoysaska
Lamaanayaasha Diiwaangashan
Guurka qasabka
Dhalasho
Fasaxa umusha iyo lacag siinta umusha
Gunnooyinka qoyska

10 **Carruurta** 28
Ku korida luqado badan
Latalinta Waalidka
Barnaamijyada qoyska iyo waalidka – Apps
Buugaag iyo ciyaaro la amaahsado
Adeegyada daryeelka
Wicitaanka degdega ee waalidka

11 **Dugsiga iyo tabarbarka shaqooyinka** 30
Masuuliyada waalidka
Mihnadaha adeegga oo bilaash u ah da'yarta
Dugsiyada sare iyo tababarada xirfadaha
Koorsooyinka ku-meelgaarka ah/xiriirin
Dhalinyarada soogalootiga ee waaweyn
Dugsiga naxwaha, dugsiyada dhexe takhasuska iyo ganacsiga
Xirfad barashada
Shahaadada Xirfadda
Qaybta waxbarashada sare tababarka dheeraadkaa iyo asaasigaa
Adeegga dugsiga cilmi nafsaaniga
Daawaynta xanuuka maskaxda carruurta dhalinyarada Graubünden
Dhibaha ku wajahan carruurta

12 **Guryeynta** 35
Bandhiga Guryaha
Xarunta Talada iyo Sharciga Heshiiska Kirada

13 **Caafimaad** 38
Cinwaanada dhakhaatiirta
Xanuun ama shil
Cisbitaal
Talo daryeelka iyo taageerada guriga
Dadka waayeelkaa
Dadka naafada ah
Dadka qaba dhibaatooyinka cilmi nafsiga

14 **Caymiska** 40
Caymisyada waajibka ah
Caymiska asaasigaa ee caafimaadka
Yaraynta lacagaha caymiska ee caymiska caafimaadka
Caymiska shilka
Caymiska iskaa wax u qabsa ah

15 **Canshuuro** 42

16 **Adeegga latalinta Bulshada iyo lacagaha bulshada** 43
Latalinta Shaqsiga gaarahaaneed ee xaga Arimaha bulshada
Caawimaada lacagta bulshada

17 **Maalin walba – Waxyaabaha lala kulmo** 44
Nolosha Xaafadaha/nolosha Tuulada
Ururada iyo Jaaliyado
Ururada Ajaanibta
Matxafka hiddaha iyo dhaqanka, tiyaatarada iyo shineemooyinka
Adeegashada
Baananka

Fasaxyada dadwaynaha
Safarada kooban iyo Raaxeysiga

18 **Isku socodka** 47
Gaadiidka dadwaynaha: Tareenka iyo baska
Baabuur ku wadashada Swiiserland
Baaskiilad

19 **Bey'adda** 50
Ilaali bey'adda!
Qashinka
Biyaha cabbitaanka

20 **Cinwaano waxtar leh iyo xiriiriyayaal** 52
Walaacyada maalinlaha
Shaqo
Kala soocid/Cunsurnimo
Qoyska iyo lamaanidmada
Lacagaha
Caafimaadka
Qalalaasaha/caawimaada dhibanaha
Isdhexgalka/Muhaajirka
Tarjumaan dhaqameed
Ilmaha iyo dhalinyarada
Warbaahinta dadka so galootiga
Adeegyada bulshada
Dugsiyada Luuqadaha
Sharciga

21 **Waxaa la sameeyo xaaladaha degdegaa** 64

**Talo sharci** 66



# ALLEGRA, GRÜEZI, BUONGIORNO

## Gacaliye deganaha cusub

Anigoo ku hadlaya magaca dowlada Gobolka Graubünden waxaan jeclaan lahaa inaan si diiran kugu soo dhaweyno gobolkeena.

Markaad degto gobolkeena waxaad qayb ka noqotay bulshadeena kaladuwan, kana kooban kooxo dad tiro badan. Kuwani kuma kala duwana oo kaliya luqadaha ay ku hadlaan,halka ay ka yimaadeen iyo dhaqamadooda, laakiin sidoo kale marka loo eego da'da, Xirfadaha, xiisaha iyo waxyaabo aad u badan. Ku noolaanshaha kala duwanaanshahu waa nolol maalmeedka Graubünden waxayna la imaan kartaa fursado iyo caqabado labadaba.

Graubünden way kala duwan tahay wax badana way ku deeqaan. Dhulkeena waxaa lagu gartaa 150 dooxooyin, 615 harood iyo 937 buuraha dhaadheer. Afafkeenna rasmiga ahi waa Jarmal, Retoroman iyo Talyaani. Ma ogeyd, In Switzerland Romansh looga hadlo oo kaliya Graubünden mana ahan hal luuqad keliya, laakiin waa qoys leh shan erey: Sursilvan, Sutsilvan, Surmiran, Puter iyo Vallader? Waxaan ku faraxsanahay caadooyinkii qarniyadii hore iyo caadooyinkeena, laakiin isla mar ahaantaana waxaan xiiseeyneynaa xilligan casriga ah waxaanan dooneynaa inaan mustaqbalkeena bulsheed isla qaabeyno.


Waxqabadyo badan iyo mashruucyo ka socda Gobolka oo ay ku jiraan dalabyo badan oo lagu dhiiri gelinaayo is dhexgalka waxaa ka go'an xoojinta wadajirka bulshada. Wada jirka ayaan xoog ku leenahey, iyadoo taa maskaxda lagu hayo waxaan kugu martiqaadeynaa inaad ka qeybqaadato nolosheena bulsheed, dhaqaale iyo dhaqan.


Ka ogow degmada aad ku nooshahay, ama waaxda isdhaxgalka ee Gobolka wixi ku saabsan macluumaadka iyo talooyinka adeegyada iyo koorsooyinka aad heli karto. Waxaan rajeyneynaa inaad sida ugu badan uga faa'iideysan doonto fursadaha ay bixiyaan.

Waxaan kuu rajeyneynaa biloow wanaagsan gurigaaga cusub.

**Peter Peyer**
Golaha Maamulka

# MACLUUMAAD KU SAABSAN SWIISERLAND






**Tiro ahaan (2019)**

| | |
|---|---|
| Tirada dadka | 8 606 000 |
| Muwaadinniinta ajnabiga | 25.3 % |
| Jiidda | 41 300 km$^2$ |
| Gobolka | 26 |

## Taariikh kooban iyo cilmiga bulshada

Bishii 1 Ogoosto 1291, «Iskudarkii Hore» ayaa waxaa asaasay dawladaha hoose Uri, Schwyz iyo Unterwalden in ay noqdaan gaashuun buurta baahsan ee dooxada dawladaha hoose. Dawlaha kale ee hoose iyo gobolada ayaa iyana ku soo biiray markii ku xigtay, ayagooabuuraya goboloda dawlada dhexe ee Swiiserland badhtamihii sannadkii 1848. 1da bisha Ogoosto waxay ka tahay Swiiserland maalin fasax qaran.

Swiiserland waa dimuqraadiyad toosa oo haweenka iyo ragga xaqa u leh inay codkooda dhiibtaan ay saamayn toosa ku yeelan karaan siyaasada maaha mid doorashad oo kaliya loo sii maro laakiin sidoo kale waxaa mararka qaarkood loo sii maraa arrimo iyo shuruuc loo sii maro afti. Xaq u yeelashada wadajirka aayo ka tashiga ayaa ah heerar qaran, ismaamul goboleed iyo mid dawlad hooseba. Dadka Swiss ka ahi waxay xaq u leeyihiin inay codkooda dhiibtaan da'da laga bilaabo 18.

**Luqadaha**

61.2 %
Jarmal

22.3 %
Faransiis

8.0 %
Talyaani

0.5 %
Romansh

23.8 %
Luqadaha kale

(BFS 2017)

Waxaad ka heli kartaa macluumaad intaas dhaafsiisan oo ku saabsan cilmiga bulshada ee Swiiserland guddaha buugga yare ee macluumaadka sidaha «Echo». Waxaa lag dalban karaa dhammaan tukaanada buuggaagta iibiya ama waxaad ka heli kartaa
**HEKS, Regionalstelle Ostschweiz**
✆ 071 410 16 84
www.echo-ch.ch

3


# MACLUUMAAD KU SAABAN GOBOLKA GRAUBÜNDEN



## Xaqiiqada iyo tirooyinka (2019)

In ka badan 199,000 dada oo ku nool gudahagobolka Graubünden. Dadkan, qiyaas ahaan 37,300 ayaa ah muwaadiniinta ajanabigaa. Oo ku fadhiya bad dhan 7,106 $km^2$, Graubünden waxaa weeye maamul goboleedka uga wayn ee ku yaala Swiiserland, waxay ku fadhidaa bad dhan $\frac{1}{6}$ isugaynta guud ee jiida Swiiserland. Qiyaas ahaan 35,400 dada ayaa ku nool guddaha magaalada gobolka Chur, mid ka mida deegaanada ugu da'da way nee ku yaala Swiiserland.

Kanton waxeey hoos imaanee 11 goboll iyo 106 deegmooyen. 50 % in ka mida dawladaha hoose ayey degan yohiin in yar 1000 dad deegaana.




| | |
|---|---|
| Tirada dooxooyinka | 150 |
| Tirada harooyinka | 615 |
| Tirada fiiqa ugu sarreeya buuraha | 937 |

Macluumaad intaas dhaafsiisan waxaa laga heli karaa barta shabakadda www.gr.ch

4

# KALA DUWANAANSHIYAHA LUQADAHA KA JIRA GOBOLKA GRAUBÜNDEN




**Luuqadaha ka jira gobolka Graubünden**

- Jarmal
- Romansh
- Talyaani

## Saddex luqadood oo rasmi ah ayaa ka jira gudaha gobolka Graubünden: Jarmal, Romansh iyo Talyaani.

**Jarmal**
Dadka deegaankaa badankooda ismaamul goboleedka, Jarmalka ayaa ah luqada koowaad ee lagaga hadlo, tusaale ahaan. Waxay qoraan Jarmal sare ama waxay ku hadlaan Swiss Jarmal.

**Romansh**
Gudaha dooxada Engadin, Münster, gudaha Dhexda Graubünden iyo guddaha Surselva, Romansh ayaa ah luuqada la isku fahno. Romansh maaha luuqada kaliya ee; sidoo kale waxaa weeye qoyska 5 luuqadood ee u gaarkaa: Sursilvan, Sutsilvan, Surmiran, Puter iyo Vallader.

**Talyaani**
Talyaani ayaa lagaga hadlaa afar dooxooyin Puschlav, Bergell, Misox iyo Calanca.



# ISDHEXGALKA

Isdhexgalku waa hanaan socod firfircoon, gaar ahaaneed iyo bulsho ahaaneed oo salka ku haysa xidhiidhk saaxiibtinimada ka dhaxeeya waajibaadka iyo xuquuqaadka iyo himilooyinka si loo fududeeyo ka qaybqaadashada ganacsiga iyo nolosha bulshada ee dhammaan qaybaha tirada dadka. Kor u qaadista isdhexgalku wuxuu salka ku hayaa mabda'a «carqaladaha iyo dhiirigalinta» iyo taageerada gaarkaa ee barashada luqada, horumarinta xirfadeed iyo ka qaybqaadashada bulshada.

Waaxda Isdhexgalka ayaa maareeysa oo isku duwa kor u qaadista isdhexgalka gaarkaa ee gobolka iyo heerka dawlada hoose. Waxay kor u qaadaa oo ay taageertaa mashaariicda ku saabsan isdhexgalka luqadaha iyo bulshada ooy xaqiijiyaan bixinta macluumaadka ka jira jiida isdhexgalka.

**Fachstelle Integration Graubünden (Waaxda Isdhexgalka)**
✆ 081 257 26 38
www.integration.gr.ch

**Xarunta dhexe ee isdhexgalka dadyowga kala duwan iyo warkalaqaadashada ama Informeshanada Graubünden**
Xarunteena ama xafiiskeena dhexe ee isdhexgalka dadyowga kala duwan ee cinwaankiisu yahay Grabenstrasse 1 in Chur waxaad ka helaysaa ama diyaar kuula nahay sida soo socoto:

- xafiiskeena wuxuu diyaar kuula yahay wax alla wixii talo iyo tusaale ah ee ku saabsan isdhexgalka dadyowga kala duwan, waxaana si habsami leh kaaga haqabtireynaa su,aalahaaga ku saabsan isdhexgalka.
- Guud ahaan wixii ku saabsan Gobolka iyo meelaha aad ka heli kartid Korsooyinka luqada iyo isdhexgalka dadyowga.
- Talo siin adiga qaas kuu ah xaga luqada barashadeeda waxaan suuragal ah in imtixaan yar lagaaga qaado aqoonta aad luqadda u leedahay si laguu geeyo ama u heshid fasal adiga heerkaada aqooneed u dhigma.

**Informationszentrum Integration Graubünden (Xarunta warkala qaadashada isdhexgalka dadyowga)**
✆ 081 257 36 83
Waqtiyada ay furantahay waxaad ka helaysaa barteena internetka ee cinwaankeedu yahay
www.integration.gr.ch

Cinwaanka intarneetka www.hallo.gr.ch waxaad ka heleeysaa macluumaad oo luqadu badan lagu tarjumay oo ku saabsan nolol mallmedka sidaa nolosha Graubünden, shaqada, isgoolka, cafimaadka, iyo guriga.

www.hallo.gr.ch



# XIDHIIDHKA

### Luqada, furaha guusha isdhexgalka

Ma dooneysaa inaad firfircooni iyo sinaansho ku yeelato, gudaha sida dhaqaalaha, dhaqanka iyo nolosha bulshada goobtaada cusub ee aad degan tahay? aqoonta wanaagsan ee luqada degaanka waxay kuu furi kartaa albaabo badan. Ka qaybgal koorsada barashada luqada oo adeegso barnaamijyada barashada-luqadeed apps si adiga naftaada lagu fahmo nolol maalmeedka.

Liiska iskuulada luuqadaha ee gobolka ku yaal waxaa laga heli karaa cutubka Cinwaanada iyo xiriiriyeyaasha wax tarka leh ee Bogga internetka www.integration.gr.ch Wuxuu sidoo kale guud ahaan bixiyaa koorsooyinka luqada hada jira. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barashada luqada ama talobixinta luqadeed, waxaad kala xiriiri kartaa Xarunta Macluumaadka Is dhexgalka.

**Informationszentrum Integration Graubünden (Xarunta warkala qaadashada isdhexgalka dadyowga kala duwan Graubünden)**
✆ 081 257 36 83
Waqtiyada ay furantahay waxaad ka helaysaa barteena internetka ee cinwaankeedu yahay www.integration.gr.ch

### Adeegga Tarjumaha

Barashada luqada degaanka waa mid muhiim ah. Si kastaba ha ahaatee waxaa laga yaabaa, in loo baahdo turjubaan dhaqameed si uu kaaga caawiyo in naftaada si sax ah lagu fahmo wada hadalka iyo kulamada muhiimka ah. Arge Verdi – Interkulturelles Dolmetschen in der Ostschweiz (tarjubaanka dhaqanka ee Bariga Swiiska) waxay bixisaa turjubaanno dhaqamada kaladuwan ku dhawaad 60 luqadood. Adeegana waa lacag.

**Arge Verdi – Interkulturelles Dolmetschen in der Ostschweiz (Tarjumaanka dhaqanka ee bariga Switzerland)**
✆ 0848 28 33 90
www.arge.ch/verdi

Adeega turjubaanka taleefanka wuxuu bixiyaa in kayar daqiiqado gudahood turjubaano xirfad leh, sidoo kalena -Luqadaha qaarkood waxaa la helaa saacad kasta 365 maalmood sanadkii. Adeegani waa lacag.

**Adeega turjumaanka teleefonka**
✆ 0842 442 442
www.0842-442-442.ch

# SHAQADA

### Shaqee halka kuwa kale ay ku qaataan fasaxyadooda!

Caalamnimadu waxay dhaqan dheer ku leedahay Graubünden. Dalxiiiska ayaa ah qaybta hogaamisa dhaqaalaha, qaybta caafimaadka, shirkaddaha xajmigoodu meel dhexaad yahay, shirkaddaha caalamiga iyo qaranka ah ee firfircoon marka lagu daro maamulka ismaamul goboleedka ayaa bixiyaa tiro aad u balaadhan oo shaqooyin soo jiidasho leh oo ay kuwada jiraan dhammaan xirfadlyaasha kala duwan.

### Isdhexgalka xirfadaha

Shaqada ayaa xaqiijisa qaab nololeedka dadka oo kor u qaada isdhexgalka bulshada dhexdeeda. Shuruuda looga baahan yahay shaqadu waxa weeye oggolaanshaha shaqada iyo aqoonta haboon ee luuqadaha maxaligaa. Barta shabakaddaha soo socda, waxaad ka heli doontaa macluumaadka ku saabsan oggolaanshaha deegaanka lagamamaarmaankaa iyo shaqada.

www.kiga.gr.ch
www.afm.gr.ch
www.sem.admin.ch
www.swissuni.ch
www.berufsberatung.ch
www.migraweb.ch

### Mushaharka iyo Deeqsiga Bulshada

Mushaharkaaga ayaa laga jarayaa waajibka Caymisyada ee Dadka Waayeelkaa iyo Caymiska Samatabaxayaasha (AHV – tiirka 1aad), caymis Aan shaqaynayn (IV), Caymiska Shaqo la'aanta (ALV) iyo Caymiska Shilka (UV) ayaa laga jarayaa gunadaada. Laga soo bilaabo dakhliga sannadle ee qisaas ku dhawaad CHF 20,000.00, deeqaha ayaa sidoo kale laga jarayaa nidaamka lacagaha xirfadaha (tiir ku sheega 2aad) oo ay dheeraad ku tahay AHV. Guud ahaan, caymiska amniga bulshada waajibka ahi wuxuu ka kooban yahay ku dhawaad 15 % dakhliga.

### Shaqo raadsi

Xayaasiiska shaqada ayaa laga daalacan karaa Xarumaha Shaqaalaysiinta Goboleedka (RAV) oo laga heli karo jariiradaha maalinle, maqaalo goboleedka ama dawalada hoose, eek u yaala wakaaladdaha ku sii meel gaadhkaa iyo kuwa yaala Internet, tusaale ahaan

www.arbeit.swiss
www.suedostschweizjobs.ch
www.jobs.ch

### Shaqo la'aan – maxaa jira hadda?

Dadka ku nool Swiiserland ee noqday shaqo la'anta waxay xaq u leeyihiin lacagaha shaqo la'aanta la siiyo ayaa dhammaan lagamamaarmaan u ah

shuruudaha dhammaan la wajahayo. Xaalahadaha asaasigaa ee jiidan waxay ku eeg tahay oggolaanshaha degnaanshiyo muddo 12 bilood oo shaqo ah muddo 2 sannadooda kahor intaanay bilaa shaqo noqon.

Su'aalaha la xidhiidha shaqo la'aanta, fadlan kala xidhiidha Lacagaha Caymiska Shaqo la'aanta iyo Xarumaha Shaqo Ku meelayn Goboleedka (RAV).

Waxyaalaha soo socda waa muhiim haddii aad noqoto ama aad halis ugu jirtid inaad shaqo la'aani kugu dhacdo:

- Si degdega u bilow shaqo raadin cusub haddii aanad muddo dhawayd bilaabin. Caddaynta dedaaladan waxay tahay in la gudbiyo marka aad ku andacoonayso lacagta shaqo la'aanta. Waraaqo iswaydaarsiga iyo nuqulad qoran ee codsiga iyo waraaqaha diidmada ayey tahay in la ilaashado.
- Fadlan si degdeg warbixin u soo gudbi xarunta shaqada ee ku taala goobta aad ku nooshahay.

Macluumaad dheeraada waxaa laga heli karaa barta shabakadda

www.kiga.gr.ch oder
www.arbeit.swiss

### Shaqo aan sharci ahayn

Dadka lagu lacag siiyo shaqooyink marmar la qabto ee ku yaala jiidaha nadiifinta, daryeelka ilmaha, qoyska iyo beerta, ayaa sidoo kale aad looga fikiraa tayada shaqaalaysiinta oo ay marka hore waajib tahay in oggolaansho laga helo bilayska u qaabilsan Ajnabiga marka labaadna ay tahay in laga tasjiiliyo maamulada amniga bulshada, ama lafahaantiisu/lafhaanteedu ay is tasjiiliso. Haddii aan samayn, tani waxay noqonaysaa shaqo aan sifo sharci waafaqsanayn oo qofka ay khuseeysaana aanu ku jirin caymska shaqo la'aanta haddiiba ay dhacdo shaqo la'aani, shil ama mid aan ku haboonayn.

**Staatssekretariat für Wirtschaft SECO (Xoghaynta Gobolka ee Arrimaha Dhaqaalaha)**
✆ 058 462 56 56
www.keine-schwarzarbeit.ch

### Tababar Asaasigaa oo dheeraada

Waxaa jira macluumaad kala duwan oo ku saabsan tababarka asaasigaa ee dheeraadkaa ee xarumaha macluumaadka xirfadaha (BIZ). Shaqaalaha takhasusa ayaa loo heli karaa macluumaadka iyo wadahadalada kooban. Booqashadu waa bilaash waana suurtogal bilaa balana inta lagu jiro saacadaha furitaanka. Talo bixin shaqada gaarkaa, taas oo lacaga, ayaa u baahan kahor balanta.

Macluumaad ku saabsan xirfada, daraasadaaha iyo kala talinta shaqada iyo waxyaalaha ku saabsan xarumaha

macluumaadka iyo latalin goboleedka (BIZ) waxaa laga heli karaa barta shabakadda

**Amt für Berufsbildung Graubünden (Xafiiska Waxbarashada Shaqada)**
✆ 081 257 27 68
www.berufsbildung.gr.ch

### Aqoonsiga shahaadooyinka ajnabiga

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid aqoonsiga shahaadooyinka shisheeye, waxaad la xiriiri kartaa xarunta xiriirka qaran ee Xoghaynta gobolka ee waxbarashada, Cilmi baarista iyo curinta.

**Staatssekretariat für Bildung, Forschung und Innovation SBFI (Xoghayaha guud ee wasaarada waxbarashada, cilmibaarista iyo aaladaha cusub)**
✆ 058 462 28 26
www.sbfi.admin.ch

Haddii aad leedahay waayo aragnimo xirfad sannado badan, way shaqayn kartaa waayo aragnimadaadu, iyagoo waafaqsan xaalado gaara, iyo helitaanka shahaadada xirfadeed laga aqoonsan yahay guddah waddanka Swiiserland.

**Amt für Berufsbildung Graubünden (Xafiiska Waxbarashada Shaqada)**
✆ 081 257 27 68
www.berufsbildung.gr.ch

### Aqoonsiga shhadaddda digriiga

**Rektorenkonferenz der Schweizerischen Hochschulen (Shirka Rectors 'ee Jaamacadaha)**
✆ 031 335 07 40
www.swissuniversities.ch



# RUSQAD DEGNAANSHAHA IYO RUSQAD DEGNAANSHAHA LAMAANAHA IYO CARRUURTA

Oggolaanshaha deegaanka ee muwaadiniinta EU/EFTA ayaa codsan kara kahor iyo kadib gelitaanka Swiiserland labadoodaba. Oggolaanshaha degnaanshiyaha muwaadiniiinta Wadamada saddexaad kuwas oo shaqeeya (muwaadiniinta qaybaha aan xubin ka ahayn EU/EFTA) ayaa loo soo saari doonaa oo kaliya arrimo gaara mooyee. Haddii aynu si kale u dhigno hadalka, haddii ay yihiin shaqaale aqoon leh ama ay jiraan arrimo gaara oo caddaynaya ka dhaafitaanka.

Muwaadiniinta dalalka xubnaha ka ah EU/EFTA waxay awoodaan inay si caadi ah u soo kaxaystaan xubnaha qoyskooda iyada oo aan la qaddarinayn nooca ruqsadda deganaanshaha ay haystaan. Waalidiinta iyo carruurta waxay ka mid yihiin xubnaha qoyska. Muwaadiniinta dalalka saddexaad ee haysta ruqsadda deganaansho waxay ka codsan karaan in qoyskooda loo keeno (xaaska iyo carruurta) Xafiiska Socdaalada iyo Sharciga Madaniga ah (Amt für Migration und Zivilrecht), iyaga oo tixgelinaya shuruudaha la rabo. Codsiga keenista qoyska waa in lagu gudbiyo 5 sanno gudahood, halkan carruurta ka yar da'da 12, ay tahay hal sanno. Xafiiska Socdaalada iyo Sharciga Madaniga ee Grisons (Amt für Migration und Zivilrecht Graubünden) ama websaydkooda, waxa yaala xaashiyo macluumaad ah oo la xiriira ruqsadaha deganaanshaha iyo keenista qoyska oo macluumaadka ugu muhiimsan ay ku qoran yihiin Jarmal iyo Talyaani.

**Amt für Migration und Zivilrecht Graubünden AFM (Xafiiska Socdaalada iyo Sharciga Madaniga)**
✆ 081 257 30 01
www.afm.gr.ch

# GUURKA IYO QOYSKA

## Guur

Swiiserland guddaheeda, waad inaad tahay 18 jir si aad u guursato. Guurarka kaliya ee lagu qabto xafiiska tasjiilinta ayaa la aqoonsan doonaa. Xafiiska tasjiilinta masuulkaa ee ku yaala goobtaada degaanka ayaa kugu wargalin doona waxa ku saabsan shuruudaha loo baahan yahay in la buuxiyo iyo waraaqaha loo baahan yahay.

## Lamaanaha labo jinsi-qaran kala haystaan iyo qoysaska

Mid ka mid ah sadexdii guur ee Switzerland laba ka mid ah waa jinsi-qaran oo is guursadey. Bogga Internetka www.binational.ch waxaa laga helaa su'aalo iyo jawaabo soo wajaha lamaanaha labo jinsi-qaran kala duwan haytsaan iyo qoysaska.

www.binational.ch

## Lamaanayaasha Diiwaangashan

Xaasaska isqaba ee isku sinjiga ahi waxay leeyihiin ikhitiyaar ay ku tasjiiliyaan lamaanimadooda. Xafiiska tasjiilinta masuulkaa ee goobta aad ku nooshahay ayaa kugu wargalin doona waxyaalaha ku saabsan talaabooyinka la qaadayo.

## Guurka qasabka

Swiiserland guddaheeda, waxaa ka jira doorasho madax banaan ood ku dooran karto lamaane. Sidaas daraadeed, qoysaska ama dadka kale xaq uma laha inay xoog ku muquuniyaan haweenka ama raga guur ka soo horjeeda rabitaankooda.

**Fachstelle Zwangsheirat (Qaybta guurka qasabka)**
✆ 0800 800 007 (Khadtelefoon Lacag la'aan)
www.zwangsheirat.ch

## Dhalasho

Dhalashadii kasta waxaa waajiba in laga tasjiiliyo xafiiska tasjiilinta masuulka goobta aad ku nooshahay. Haddii uu ilmuhu ku dhasho cisbitaalka, cisbitaalka ayaa tasjiilin doona dhalashada. Ilmaha guriga ku dhashana, umulisada ayaa ka masuula tasjiilinta dhalashada.

### Fasaxa umusha iyo lacag siinta umusha

Haweenka shaqaynayey markii uu ilmhoodu uu dhashay waxay xaq u leeyihiin in la siiyo lacagta umusha. Xaalada arrintani waxay tahay in la cayimiyey muddadii sagaalka bilood ahayd ilaa iyo intii laga gaadhayey dhalmada oo ay muddadanina ay ku jirtay shaqada ugu yaraan muddo 5 bilooda. Xaq u yeelashadu waxay bilaabmaysaa maalinta dhalashada waxaanay dhammaanaysaa ugu danbayn 14 toddobaad kadib. Waqtigan, ilaa 80% mushaharka ayaa la bixin karaa, ugu badnaan haseyeeshee CHF 196.00 maalintiiba.

**Sozialversicherungsanstalt Graubünden**
**SVA (Hay'adda caymiska Bulshada)**
✆ 081 257 41 11
www.sva.gr.ch

### Gunnooyinka qoyska

Shaqaalaha la shaqaalaysiiyey ayaa xaq u leh gunnooyinka qoyska. Carruurta gaadha da'ada ilaa 16 jir, gunaha ilmuhu wuxuu noqonayaa CHF 220.00 bishiiba. Dhalinyarada ku jirta waxbarashada ama tababarka gaadhaya ilaa ugu badnaan da'da 25 jir gunada tababarku/waxbarashadu waxaa weeye CHF 270.00 bishiiba. Loo shaqeeyaha ayaa caadiyan ku wareejin doona gunada qoyska oo ay la socoto gunadu. Sida ku cad xaaladaha qaarkood, waalidiinta aan shaqayn ayaa sidoo kale heli karta gunada ilmaha.

**Sozialversicherungsanstalt Graubünden**
**SVA (Hay'adda caymiska Bulshada)**
✆ 081 257 41 11
www.sva.gr.ch



# CARRUURTA

### Ku korida luqado badan

Ilmuhu wuxuu si fiican u baran karaa laba luqadood ama in ka badan laga bilaabo dhalashiisa. Talo bixinta waalidiinta «ila hadal iyo I dhageyso!» waxay bixiyaan talooyin sidaad ku horumarin kartid luqadaha badan ee canugaaga. Warqada warbixinta waxaa lagu heli karaa 14 luqadood waxaana ku dalban kartaa lacag la'aan.

**Fachstelle Integration Graubünden (Waaxda Isdhexgalka)**
✆ 081 257 26 38
www.integration.gr.ch

### Latalinta Waalidka

Waalidka haysta dhalaanka iyo carruurta yaryar waxay la xiriiri karaan adeega la-talinta waalidka. Waxay ka heli doontaa taageero su'aalaha la xiriira nafaqada, daryeelka, ilaalinta iyo koriismaha. Xitaa haddii ilmahaagu ooyo marar badan ama uusan degeneyn, Caawimaada waxaad ka heli kartaa xarunta Lataliyayaasha waalidka. Lataliyayaasha waalidka ayaa gurigaaga kugu soo booqan kara haddii aad codsatid ama macluumaadka waxay kugu siinayaan taleefanka ama khadka tooska ah.

Macluumaadka ku saabsan adeegyada latalinta ee gobolkaaga waxaad ka heli kartaa degmadaada

### Barnaamijyada qoyska iyo waalidka -Apps

Waxaa jira barnaamijyo Apps badan oo wax ku ool ah oo waalidiinta ka caawiya nolol maalmeedka qoyska ee dhinacyo kala duwan. Qaarkood waxay leeyihiin luqado badan waana lacag la'aan.

**Parentu** – Talooyin loogu talagalay waalidiinta carruurta da'doodu u dhaxayso 0 illaa 16
**Kleine Weltentdecker (Sahamiye yar ee aduunka)** – Talooyin loogu talagalay waalidiinta carruurta yaryar
**Erste Hilfe (SRK)** – Gargaarka koowaad - xaaladaha degdega ah

### Buugaag iyo ciyaaro la amaahsado

Goobooyin kala duwan oo ku yaala ismaamul goboleedka, waxaa jira maktabado (buuggaag) iyo maktabadaha caruusaaha. Buuggaag iyo carruusadaha ayaa laga amaahan karaa halkaa ee gacan ka gaysashada lacagta.

Maktabada magaalada Chur waxay bixisaa warbaahin luqadaha qalaad oo fara badan. Waxay sidoo kale furan tahay fiidkii iyo usbuucyada dhamaadkiisa sida Sabtiga iyo Axada.

### Adeegyada daryeelka (ee lacagta)

**Koox ciyaareed**

Koox ciyaareeda, carrurta ka bilaabanta da'da 3 ayaa kulma hal mar ama laba jeer toddobaadkii ilaa iyo inta ay ka

waynaanayaan inay tagaan u diyaargaroowista dugsiga kahor. Playgroup ayaa siiya carruurta bey'ad nabdoon oo fudud kaas oo uu/ay ka heli karo waayoaragnimadiisa/ waayoaragnimadeeda kabaxsan qoyska. Macluumaad ku saabsan arrintan ayaa laga heli karaa goobta aad ku nooshahay.

**Xanaanada caruurta iyo Xanaaneeyayaasha**
Xanaaneeyaha caruurta ayaa daryeelaya carruurta ilaa iyo inta ay ka gaadhayaan inay tagaan dugsiga. Waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan adeegga daryeelka ilmaha goobta aad ku nooshahayama waxaad ka heli kartaa barta shabakadda

**famur – für Familien in Graubünden (loogu tala galay qoysaska ku nool Graubünden)**
✆ 081 300 11 40
www.famur.ch

Carruurta ayaa sidoo kale waxa xanaananaya aayado. Aayadaha ayaa xanaananaya carruurta da'daha dhammaantood, oo ay ku jirto da'da carruurta dugsiga, ee guryahooda. Waqtiyada daryeelka ilmaha (qadada, caawimaada shaqada guriga, maalinta kala badhkeed, maalinta gebihaanteed ama dhammaadka toddobaadkii daryeelka ilmaha) ayaa la isku raacaa si shaqsi ahaaneed.

**Hawlaha ka baxsan casharada ardayda**
Fadlan la xidhiidh maareeynta dugsigaaga ama waaxda ka masuulkaa ismaamul goboleedka haddii aad hayso wax su'aalo ah oo la xidhiidha adeegga sida ururka dugisiga kadib, qado ama, ama fasax qaadasho.

**Amt für Volksschule und Sport Graubünden AVS (Waaxda Dugsiga Hoose iyo Isboortiga)**
✆ 081 257 27 36
www.avs.gr.ch

**Wicitaanka degdega ee waalidka**
Barbaarinta carruurta badanaa caqabad weyn ayey u tahay waalidiinta. Khadka degdega ah ee waalidiinta dhibaataysan wuxuu bixiyaa talooyin bilaash ah iyo caawimaad saacad kasta xaga taleefan ama I-mayl ahaan, arrimaha la xiriira koriismaha, iska horimaadka, ama dhibaatooyinka qoyska.ka dhex dhaca.

**Elternnotruf Graubünden (Wicitaanka degdega ee waalidka)**
✆ 0848 35 45 55 (qarashka telefoonka guriga)
www.elternnotruf.ch

# DUGSIGA IYO TABARBARKA SHAQOOYINKA

Swiiserland guddaheeda, nidaamka dugsigu way kukula duwan yihiin ismaamul goboleedka ilaa ismaamul goboleedka kale. Guddaha ismaamul goboleedka ee Graubünden, dugsigu waa waa waajib waana bilaash laga bilaabo da'da 7 ilaa da'da 16.

**Dugsiga kahor**
Laga bilaabo da'da shan, carruurta ay immanayso udiyaargaroowga dugsiga kahor. Wuxuu socdaa laba sannadood.

**Waxbarashada khasabkaa**
Waxbarashada khasabkaa ayaa bilaaba sannad guddaheed kaas oo uu ilmuhu gaadhayo toddoba oo soconaya sagaal sannadood.

**Nidaamka dugsiga ka jira gobolka Graubünden**

| | | |
|---|---|---|
| Dugsiga kahor | | 2 sannadood |
| Heerka Hoose | Dugsiga hoose | 6 sannadood |
| Heer Sare l I | Dugsiga sare, dusgiga dhexe | 3 sannadood |
| Heer sare level II | Iskaa wax u qabso 10th<br>dugsiga naxwaha, dugsiga dhexe takhasuska,<br>xirfad barashada/shirkadda tababarista tababarka,<br>dugsiga sare ee xirfadaha | 2 – 5 sannadood |
| Heerk tacliinta sare | Kuliyada sare<br>kuliyada farsamada Jaamacda,<br>Macadka Dawlada dhexe ee Farsamada | 3 – 6 sannadood |

Macluumaadka ku saabsan dhammaan mawduucyada dugsiga ayaa laga heli karaa dugsiyada ama

**Amt für Volksschule und Sport Graubünden AVS (Waaxda Dugsiga Hoose iyo Isboortiga )**
✆ 081 257 27 36
www.avs.gr.ch


BWS
SCHRITT
TEMPO
SCHRITT

### Masuuliyada waalidka

Waalidiiinta ayaa ka masuula korinta iyo waxbarashada carruurtooda. Waxay qaadaan masuuliyada ay ugu diraan carruurtooda dugsiga si ay u xaqiijiyaan inay tagaan dugsiga oo ay u hogaansanaadaan jadwalka iyo shuruucda dugsiga. Waxaa uu waajib ka saaran yahay inay xaqiijiyaan in dhammaan carruurtu ay ka shaqeeyaan shaqooyinkooda guri oo ay siiyaan xuduud aanay dhaafi karin si ay taas u sameeyaan. Xidhiidhka ka dhexeeya dugisga iyo waalidiinta ayaa ah muhiimada ugu way ee ka jirta Swiiserland. Waalidiintu si joogto ah ayaa loogu marti qaadaa dugsiga wadahadalad dugsiga iyo fiidadka waalidiinta. Ka qaybqaadashadu waxay muhiim u tahay waalidiinta iyo carruurta si ay u xal ugu helaan dhibaatooyinka ka jira dugsiga ama xulashada xirfada soo socota.

### Mihnadaha adeegga oo bilaash u ah da'yarta

Camal, waxbarasho iyo lataliyayaal mihnado ayaa ka gargaara da'yarta doorashada camal, waxbarasho cashar ama mihnad. Waxay ka caawiyaan qaadashada go'aan iyaga oo la sheekaysta, oo macluumaad iyo imtixaano siiya. Xarumaha latalinta ayaa ku yaala Chur, Davos, Ilanz, Poschiavo, Roveredo, Samedan, Scuol iyo Thusis.

**Amt für Berufsbildung Graubünden (Xafiiska Waxbarashada Shaqada)**
✆ 081 257 27 68
www.berufsbildung.gr.ch

### Dugsiyada sare iyo tababarada xirfadaha

Kadib muddada waxbarshada khasabkaa, carruurta ayaa go'aan ka gaadha kala doorashada dugsiga sare ee guud ama xirfad barashada.

### Koorsooyinka ku-meelgaarka ah/xiriirin

Dhalinyarada markey dhameystaan Iskuulada waxbarashada Qasabka aanan kadib wax Xirfad ama tababar ah helin, waxey aadi karaan kooraska xiriirinta ku meel gaarka ah. Taasoo ka caawin doonta ka dhisida wixii ka dhiman waxbarasha iskuulka iyo isku diyaarinta iney Xirfad tababar helaan. Waydii Macalimiinta iyo Xirfad diyaariyayaasha sida ugu dhaqsiyaha badan wixii ku saabsan deeqdas waxbarasho.

### Dhalinyarada soogalootiga ee waaweyn

Tacliintu waxay si goaansan u go'aamisaa fursadaha kaqeybgalka nolosha dhaqaalaha iyo nolosha bulshada. Markaa waa muhiim in dhalinyarada ku hadasha luuqadaha ajnabiga ah ee horay

ugu dhameystay waxbarashadooda khasabka ah dalkooda hooyo isla markaana ku soo gala Switzerland isukeenista qoysku ay heli karaan gelitaanka nidaamka tababarka xirfadda.

Waxbarashada iyo tababarka waxay gaar ahaan ku saabsan yihiin baahida dhalinyarada ku hadasha luuqada ajnabiga waxayna ka caawisaa wadada loo maro buundada ama Xiriirinta tababar shaqo. Waxaad ka heli kartaa macluumaad iyo talo ku saabsan fursadaha waxbarasho

**Informationszentrum Integration Graubünden (Xarunta warkala qaadashada isdhexgalka dadyowga kala duwan Graubünden)**
✆ 081 257 36 83
www.integration.gr.ch

### Dugsiga naxwaha, dugsiyada dhexe takhasuska iyo ganacsiga
(dugsiyada guud)

Macluumaadka ku saabsan adeeggyada kala duwan ayaa laga heli karaa barta shabakadda

www.bks-campus.ch
www.ahb.gr.ch

### Xirfad barashada

Haddii ragga iyo haweenka dhalinyarada ahi ay doortaan xirfad barashada kadib dugsiga, tusaale ahaan nijaarka, laydh yaqaanka ama dawaarlaha, waxay leeyihiin suurtogalahaanta ay ku qaban karaan xirfad barashada. Kusalaysnaanta heshiiska xirfadaha, xirfad bartayaalka ayaa laga shaqaalaysiin doonaa shirkadda tababarka halkaas oo lagu tababari doono oo lacag uu ku siin doono loo shaqeeyuhu. Waxay yimaadan kuliyada xirfadaha ha lama laba maalmood toddobaadkiiba; inta lagu jiro waqtiga inta hadhay, waxay ka faa'idaystaan s hirkadda aqoon asaasiya. Xirfad barashadu waxay socotaa laba ama afar sannadood oo waxaa lagu soo gabogebeeyaa shahaadada xirfadaha dawlada dhexe ama shahaada aqoon ku fiicnaanta. Labada shahaadaba waxaa laga aqoonsan yahay Swiiserland oo dhan.

### Shahaadada Xirfadda

Shahaadada xirfadda waxay ku kordhineysaa tababarka aasaasiga ah ee xirfadda oo leh waxbarasho guud oo la balaariyey. Waxay awood u siineysaa inaad gasho jaamacad ku takhasustay cilmiga Waxaad sidoo kale wax ku baran kartaa jaamacad leh imtixaan dhammaystir ah.

### Qaybta waxbarashada sare tababarka dheeraadkaa iyo asaasigaa

Gobolka Graubünden, waxaa jira kuliyado aad u tiro badan oo dhammaystiran, jaamacado iyo maxadyada cilmi baadhista.

**Amt für Höhere Bildung Graubünden (Waaxda Waxbarashada Sare)**
✆ 081 257 61 65
www.ahb.gr.ch

### Adeegga dugsiga cilmi nafsaaniga

Heerka adeegga latalintu wuxuu ku jihaysan yahay carruurta ku jirta u diyaargarowga dugsiga kahor iyo dugsiyada hoose haddii marka ay dhibaatooyinka dugsigu ay ka soo shaax baxaan kobaca, dabeecadaha ama fayoobaanta hiyi kaca ee ilmaha. Adeegga ayaa waxaa la siiyaa waalidiinta, carruurta, dhalinyarada, macalimiinta iyo takhasusayaasha kale ee waxbarashada hab ay ku caawiyaan iskaa wax u qabso.

**Amt für Volksschule und Sport Graubünden AVS (Waaxda Dugsiga Hoose iyo Isboortiga)**
✆ 081 257 27 41
www.avs.gr.ch

### Daawaynta xanuuka maskaxda carruurta dhalinyarada Graubünden

Haddii uu ilmhaagu u qabo dhibaatooyin cilmi nafsaani ah, dhibaato isaga/iyada ay haysato, qoyska dhexdiisa ay ka haysato, la tacaalida saaxiiibad ama haddii uu/ay khilaafo sharciga Kinder- und Jugendpsychiatrie Graubünden (kjp) waa lala xidhiidhi karaa.

**Kinder- und Jugendpsychiatrie Graubünden kjp (Cilminafsiga Carruurta iyo Dhallinta)**
✆ 058 225 19 19
www.kjp-gr.ch

### Dhibaha ku wajahan carruurta

Haddii ilmuhu muujiyo calaamadaha dhibaatada rabshadaha,waxad laxariri karta xarunta la-talinta ee caawimadka dhibanaha Graubünden waxaa heli talobixin xirfadeed iyo taageero.

**Beratungsstelle Opferhilfe Graubünden (Xarunta Talada Dhibanaha ee)**
✆ 081 257 31 50
www.soa.gr.ch

# GURYEYNTA

### Bandhiga Guryaha

Bandhiga Guryaha waxaa laga heli karaa jariirad goboleedkaaga, maqaalada maalin walba soo baxa iyo internetka. Qolol qiimo jaban leh ayaa sidoo kale mararka qaarkood laga heli karaa boodhadhka ogaysiiska macmiilka tukaanada aadka u waawayn sida Migros iyo Coop.

www.immoscout.ch
www.homegate.ch
www.comparis.ch
www.newhome.ch
www.suedostschweiz.ch

Haddii aad xiisaynayso abaartmant, waxaa haboon had iyo jeer inaad dhammaystirto foomka tasjiilinta oo siisaa waraaqaha mulkiilaha abaartmantka ama maareeyaha abaartmantka sida ka saarista diiwaanka uruurinta iyo rusqada degnaanshiyaha.

**Muhiim:**

- Warqada lagu soo bandhigay ayaad ka qoraneysaa codsi; mulkiilaha guriga ayaa dooranaya kiraystaha.
- Fadlan oggow xaaladaha heshiiska, sida waqtiyada ogaysiiska.
- Dhismayaasha Guryaha qolka kirada, waxaa jira sharciyo u yaala dhismaha kaas oo faahfaahin ka bixinaya shuruucda maamulaysa wada jirka heshiishka kiraynta (tusaale ahaan: aamusnaanta habeenkii ama isticmaalka qasaalada dharka algu maydho).
- Guri walbo oo kiro ah wuxuu leeyahay waardiye kaas oo hubiya in shuruucda dhismaha sidooda loo raacay iyo nadiifinta dhismaha guddo iyo dibadb.
- Guri Qoys walba waa inuu iska bixiyaa Canshuurta raadiyaha iyo telefishanka. Qaansheegta ayaa si toos ah soo dirta, wakaaladda ururinta canshuurta lacagta ee telefishanka Swisska (Serafe).

**Serafe AG**
✆ 058 201 31 67
www.serafe.ch

Macluumaad dheeraada iyo warqada macluumadka kooban ku qoran yahay ee ku saabsan «Guryo dejinta» – ayaa lagu heli karaa 17 luuqadood – waxaana laga heli karaa

**Bundesamt für Wohnungswesen BWO (Xafiiska Federaalka ee Guryeynta)**
✆ 058 480 91 11
www.bwo.admin.ch



**Xarunta Talada iyo Sharciga Heshiiska Kirada**

Isbahaysiga Kiraystayaasha Graubünden ayaa bixiya macluumaadka ku saabsan arrimaha la xidhiidha qol kiraynta. Dadka aan xubnaha ka ahayn waa inay adeegani khidmad ka bixiyaan.

**Mieterverband Graubünden (Ururka Kiraystayaasha)**
✆ 081 253 60 62
www.mieterverband.ch

Dhacdada khilaafaadka, waxaad la xidhiidhi kartaa dawlada hoose ee cinwaanka xarunta kamasuulkaa garsoorida.

# CAAFIMAAD

Macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan mowduuca «caafimaadka» waxaa laga heli karaa shabakadaha internetka ee www.bischfit.ch Iyo www.migesplus.ch. «Tilmaanta Caafimaadka», oo lagu heli karo luqado kala duwan, ayaa si gaar ah loogu talinayaa.

www.bischfit.ch
www.migesplus.ch

### Cinwaanada dhakhaatiirta

Liis ay ku qoran yihiin dhakhaatiirta joogta gobolkaaga ayaa laga heli karaa buugga liiska teleoonalada laga daalacdo.

### Xanuun ama shil

Swiiserland gudaheeda, waxaa weeye inaad had iyo jeer yeelato Dhaktarka xanuunada guud oo adiga kuu gaara kaas oo ah ka ugu horeeya ee lagala soo xidhiidho dhacdooyinka xanuunka iyo shilka. Haddii aanad awoodi karin inaad kula xidhiidho telefoon dhakhtarkaaga, waxaad maqli doontaa fariin ku saabsan jawaabtiisa/jawaabteeda oo uu ka jawaabayo miishiin kuu sheegaya in dhaqtarku ku jiro shaqadiisa/shaqadeeda. Adeegga xaalada degdegaa ee cisbitaalka kuu dhaw ayaa sidoo kale aad kala xidhiidhi kartaa macluumaad.

Gargaarka xaaladaha degdega ah, fadlan ka soo wac telefoon lambarka

**Lambarka xaaladda Gurmadka Degdega**
✆ 144

### Waxa la sameeyo xaaladaha degdegaa ee

Cutubka 21, bogga 64

### Cisbitaal

Haddii ay jiraan dhibaatooyin caafimaad oo u baahan baaritaano balaaran, daaweyn ama qalliin, dhakhtarkaaga qoyska ayaa kuu gudbin doona takhasusle, ka ogoow bixiyahaaga caymiska ee caafimaadkaaga Cisbitaalka aad iska daaweyn karto.

### Talo daryeelka iyo taageerada guriga

Haddii aad ku tiirsan tahay caawimaada guriga oo ay sabab u tahay xanuun ama shil, waxaad la xidhiidhi kartaa Spitex oo ku taala goobta aad ku nooshahay.

**Spitex Graubünden**
✆ 081 252 77 22
www.spitexgr.ch

### Dadka waayeelkaa

Goobta Pro Senectute, dadka waayeelka ayaa heli doona talada ama taageerada iyo weliba daryeelka guriga, haddii aad u baahato.

**Pro Senectute Graubünden**
✆ 081 252 75 83
www.gr.prosenectute.ch

**Dadka naafada ah**

